



Dalbashada Kharashkaaga Safarka haddii aad tahay Magangalyo Doon

Haddii aad tahay Magangalyo Doon (Asylum Seeker), xataa haddii aanan codsashadaada la aqbalin, kharashka kaaga baxa safarka ayaad ka dalban kartaa adeegga caafimaadka. Waxay tani ka dhigan tahay in aan adiga kuu soo celin doonno waxa kaaga baxay basaska, tareennada ama shidaalka baabuurka si aad u timaaddo ama uga tagto isbitaalka.

Buugyarahan ayaa kuu sharxaya waxa aad u baahan doonto si aad u dalbato kharashka safarka.

Si aad macluumaad dheeraad ah u hesho ama si aad u dalbato kharashkaaga tag Xafiiska Khasnajiga (Cashier's Office). Mid ayaa ku yaalla isbitaal kaste. Qof shaqaalaha ka mid ah weydii halka uu ku yaallo ama qofkaas tus buugyarahan.

Maxaan anigu dalban karaa?

Basaska, tareennada, doonniyaha iwm – Fadlan hayso tigidhadaada oo u soo qaad Xafiiska Khasnajiga

Gawaarida – Waxaan annagu adiga ku siin karnaa sicirka tirada mayl ee aad ku marto socdaalka aad ku timaaddo ama kaga tagto isbitaalka.

Galbinta – Haddii aad u baahan tahay in lagu soo raaco ballantaada, qofka ku galbinaya ama kula socda ayaa weliba dalban kara kharashka safarka (fadlan hore u weydiiso in tan lagu oggolaado)

Waxaa lacagta laga bixin karaa oo keliya nooca gaadiidka ugu qiime jaban. Annagu kuuma soo celin doonno kharashka tagsiga haddii aadan tan hore ugala heshiin takhtarkaaga xirfad gaar ah leh (consultant), tusaale ahaan sababtoo ah dhibaatooyinka dhaqdhaqaaqa.

Maxaan u baahan ahay in aan soo qaado?

Si Khasnajiga (Cashier) uu u bixiyo kharashkaaga, waa in aad soo qaaddo -

1. Kaarkaaga Diiwaangelinta Codsashada (Application Registration Card). Haddii aadan weli mid haysanin, waa in aad soo qaaddo warqaddaada garawsiga (acknowledgement letter).



2. Warqaddaada ballanta ama Foomka Dalbashada Kharashka Safarka Bukaannada (Patients Travelling Expenses Claim Form).

3. Haddii aad lacag ka dalbanayso basaska, tareennada, doonniyaha iwm fadlan soo qaad tigidhadaada.

Marka aad tagto Xafiiska Khasnajiga, waxaad iyaga tusi kartaa dhanka kale ee buugyarahan, oo lagu sharxayo waxa ay u baahan yihiin in ay sameeyaan si ay adiga kuu siiyaan kharashkaaga safarka.



Information for Cashier's Office

This leaflet has been produced specifically for asylum seekers wishing to claim travel expenses.

Asylum seekers, including failed applicants, qualify for reimbursement of travel expenses.

They must produce an Application Registration Card (ARC) as proof of their entitlement which details their name, date of birth and nationality as well as their photograph and fingerprints.



If this has not yet been issued they must present a time limited, standard acknowledgement letter which can be used until they receive an ARC.

Note that only asylum seekers are eligible - this does not apply to other types of application such as those made under Human Rights legislation.

It is unlikely that an asylum seeker will have access to a bank account so reimbursements should be made in cash.